



# Xarumaha Daryeelka Caafimaadka

Helitaanka daryeel caafimaad wakhtiyada kediska ama xaaladaha degdeg ah

**Waa maxay xarun daryeel caafimaad?**

Xarumaha daryeelka caafimaadka waxa loo sameeyay in lagu daweyyo ama la dhigo bukaanka iyo dhaawaca wakhtiga uu jiro kedis caafimaad dadweyne ama aafo kale. (Xarumaha daryeelka caafimaadka waxa marmarka qaarkood loogu yeedhaa goobo daryeel oo beddel ah.)

**Halkee bay ku yaalaan xarumaha daryeelka caafimaadku?**

Xarumaha daryeelka caafimaadku waxay ku ooli doonaan goobo kala duwan oo ah deegaanka ama beesha dhexdeeda—gudaha kiniisad, dugsi, iwm. Goobta iyo lambarka xarumaha ku dhex yaala beel kasta waxay ku xidhnaan doontaa cabbirka iyo adkaanta kediska ama arrinta degdeggaa ah.

**Ayaa tagi kara xarun daryeel caafimaad?**

Qof kasta ayaa gargaar ka raadsan kara xarun daryeel caafimaad oo kedis loogu talogalay. Hase yeeshii, iyada oo ku xidhan nooca kediska, waxa dhici karta in dadka qaarkood la weydiisto inay tagaan goob kale sida cisbitaal, goob caafimaad, ama u tagaan dhakhtarka qoyskooda ama xirfadle daryeel caafimaad oo kale.

**Waa maxay sababta aanan u tagi karin cisbitaal?**

Waxa jira dhawr sababood oo daraadood aanuu cisbitaalku u noqon karin goobta sax ah. Mudada lagu jiro kedis, waxa dhici karta in cisbitaaladu buuxaan ama ay buux-dhaafiyeen tirada dadka jirran ama dhaawacmay. Xarumaha daryeelka caafimaadku waxay awoodi doonaan inay khafiifiyaan buux-dhaafka qaarkii.

Waxa laga yaabaa inay ugu fiican tahay in la kala saaro noocyada cudurada ama dhaawacyada qaarkood – oo qaar lagu daryeelo xarumaha daryeelka caafimaadka, qaar kalena cisbitaalka.

**Mudo intee le'eg ayaa joogi doonaa xarunta daryeelka caafimaadka?**

Iyada oo ku xidhan nooca kediska ama nooca cudurkaaga ama dhaawacaaga, waxa dhici karta in kaliya aad u baahan tahay inaad mudo gaaban joogtid xarunta daryeelka caafimaadka. Waxa dhici karta in dhaawac sii culus uu qasab kaaga dhigo inaad habeen illa dhawr maalmood joogtid.

**Xarunta daryeelka caafimaadka ma la joogi karaa qof ka tirsan qoyskayga?**

Qof ka tirsan qoyskaaga ama saaxiib waad ka caawin kartaa inuu soo gaadho xarunta daryeelka caafimaadka waana aad la joogi kartaa mudada xaaladooda la qiimeynayo. Haddii qofka ka tirsan qoyskaaga la dhigo cisbitaalka habeenkaas ama mudo dheer cisbitaalka la jiifyo, waxa laga yaaabaa in aan booqashada la oggolayn ama booqashadu aad u xaddeysan tahay.

**Xayawaankayga guriga ayaa dhaawacmay ama jirran. Xarunta daryeelka caafimaadku ma caawin doontaa xayawaankayga guriga?**

Xayawaanka guriga lagama oggola xarumaha daryeelka caafimaadka. Waxa dhici karta in shaqaalaha xarunta daryeelka caafimaadku ay hayaan macluumaa ku saabsan daryeel kedis ah oo loogu talogalay xayawaanka.

**Waa immisa qiimaha lagu tago xarun daryeel caafimaad?**

Ma jiraan wax ah kharash oo ka imanaya daweyn la xidhiidha kedis oo lagugu siiyo xarumo daryeel caafimaad. Caymiskaaga ama inshuuraniskaaga lacag laguma soo dalici doono.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Web Site:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

Somali  
DOH Pub 821-069